

volcano

Xaqiiqada: Volcano ayaa ka qaraxda Gobolka Washington. Khatarta Volcanoda waxaa ka mid ah dambas kulul, dhagax weyn, dhagax dab leh, ciida oo soo daareerta iyo dhulka oo soo rogmada. Qaraxyadu waxey si xun u carqaladeyn karaan waddooyinka, laydhka, biyaha, korontada waxeyna sababi karaan khataro caafimaad oo ay wado dabeyl ku socota daruuraha oo wadata danbas uuro leh.

Maxaa la sameeyaa:

- Waxaa laga warsan karaayaa in aad guriga ama hooyga ku gabato, ama aad ka qaxdo aagga. Labadaas mid u diyaar garow.
- Haddii lagu weydiiyo in aad hoyoyga ku gabato, u diyaargarow in aad gudaha ku jirto. Soo geli gudaha qoyskaaga iyo xayawaanka. Xir albaabada, daaqadaha iyo meelaha dabka lagu shido. Dhig tuwaal qoyan iridda albaabka iyo meelaha furan oo kale si aaney dabeyshu uga soo gelin.
- Dami marawaxadaha, qaboojiyaha, qalabka kulaylinta ama nidaamyada kale ee hawada dibada ka soo jiidan kara.
- Diyaarso in aad farsameeso adigoo isticmaasho waxa aad gacanta ku heyso si aad u sameyso wax u dhaxeeya adiga iyo hawada dibadda ka imaaneysa.
- Ilaali samba-badaada adiga oo afka iyo sanku ku xiranayo mask (facemask) oo markaad isticmaasho la tuuri karo. Haddii aad leedahay mushkilad sanbab mareenka, raac nidaamka qorshaha kuu degsan ee neefta/asmada.
- indhahaaga ilaali – Iska bixi quraarada isha kugu jira ee wax lagu arko, oo xiro ookiyaale, ama muraayadaha difaaca leh (goggles).
- Haddii lagu warsado in aad qaxdo, sidaas yeel isla markiiba. Raac jidadkasta oo ay ogeysiis geeddigu bixinayo. Qaar ka mid ah jidadka waxay yeelan karaan calaamado ku yaala dhinacyada waddooyinka iyo jidadka waaweyn.
- La soco raadiyaha si aad ula socoto akhbaraadka degdeg ah.
- ***Haddii aad garaneyso qof aan awoodin in uu fahmo, arko, ama aan maqlin farriintan, fadlan u sheeg waxa ay ku saabsantahay.***

Xiriir kale ee ku caawinaya:

<http://www.seattle.gov/emergency-management/what-if/hazards/volcano-hazards-including-lahars>

<http://mil.wa.gov/emergency-management-division/hazards/volcano>

<http://www.ready.gov/volcanoes>